UK Health Security Agency

Waalid ama Daryeele Qaali,

**Ku: Badashada xanuunka baarafulka**

Waxaan warbixintaan idinku soo gudbinaynaa warbixin ku saabsan sare u kac aan ku dhowaan lahayn ee warbixinada cudurka barafuulka ee la soo gaarsiiyey Hay'adda Amniga Caafimaadka ee dalka UK (UKHSA), kaas oo ka sarreeya heerarka laga filayo xilligan.

Waxaan jecelahay inaan fursadan kuugu xasuusinno calaamadaha, astaamaha, iyo tallaabooyinka laga qaadi doono haddii aad u maleyneyso inaad ama carruurtaada uu qabo cudurkaan.

**Calaamadaha iyo astaamaha cudurkaan baarafulka**

In kasta oo ay tirooyinka kiisku aad u badan yihiin, waalidiintu waa in ay ka digtoonaadaan calaamadaha xumadda baarafulka si daawaynta ku habboon oo wakhtiga ku habboon loo helo.

Xanuunka baarafulka caadi ahaan waa jirro fudud oo dhaqso u baaba'a ka dib marka la qaato antibiyootiga. Badanaa waxay ku bilaabataa cune xanuun, madax-xanuun, qandho, lallabbo iyo matag, oo ay ku xigto finan u dareemaya sida warqad ciid ah oo la taabto.

Finanka ayaa badanaa ka soo baxa 12 ilaa 48 saacadood ka dib, sida caadiga ah waxay ku dhacaan xabadka iyo caloosha marka hore, ka dibna si degdeg ah ugu faafa qaybaha kale ee jirka.

Maqaarka cad finanku waxay u muuqdaan pink ama casaan. Maqaarka bunni iyo madowga ah waxaa laga yaabaa inay ku adkaato in la arko isbeddelka midabka, laakiin waxaad weli dareemi kartaa sida xaashi ciid lagudaadshay caml ee finanka oo waxaad arki kartaa kuuskuus kor u kacay. Bukaanka caadi ahaan dhabannada waa la nadiifiyey waxayna noqon karaan kuwo cirro leh oo ku wareegsan afka. Tan waxaa la socon kara carrabka oo u ekaada 'strawberry' oo cas oo dhalaalaya.

In kasta oo ay korodhay aynu ku aragno qandhada baarafulka iyo caabuqyada kale eegroup A, khatarta ay bakteeriyadu keento caabuq aad u daran ayaa ah mid aad u hooseeya. Laakiin sida waalid, haddii aad dareento in caruurtaada si xun u dhibaatooyeyn, waa inaad ku kalsoontahay go'aankaaga. Hadii aad lacala aad iskagashakiso ama canugaaada uga shakiso xanuunka baarafulka:

- **la xiriir takhtaradaada ama NHS 111 sida ugu dhaqsaha badan, maadaama daaweynta hore ee cudurka baarafulka oo ay ku jiraan daawooyinka antibiyootikada muhiim u tahay in laga yareeyo halista cudurka oo ah mid xun**
- hubi in adiga ama canugaada inaad qaadatan antibiyootig dhameestiran sida laidin sooqoray. In kasta oo adiga ama ilmahaagu aad dareemi doontaan isla markiiba ka dib markaad bilowdo qaadashada antibiyootiga, waa inaad dhammaystirtaa qaadashada si aad u hubiso inaadan bakteeriyada ku qaadin cunaha ka dib markaad bogsato
- guriga joog, ka fogaana xanaanada, dugsiga ama shaqada ugu yaraan 24 saacadood ka dib markaad bilowdo daawaynta antibiyootiga, si aad uga fogaato faafitaanka caabuqa

Waxaad ka caawin kartaa joojinta faafitaanka caabuqa adigoo gacmo dhaqid ah oo joogto ah iyo inaadan wadaagin maacuunta, dharka, gogosha iyo shukumaanka. Dhammaan unugyada wasakhaysan waa in isla markiiba la tuuraa.

**Jirada layiraahdo Invasive Group A Strep (iGAS)**

Isla Bagteeriyada sababta xanuunka baarafulka waxay sidoo kale keeni kartaa noocyo kala duwan oo caabuqyo ah sida caabuqyada maqaarka (impetigo) iyo cune xanuun. Xaalado dhif ah, bakteeriyadu waxay geli kartaa dhiigga waxayna sababi kartaa jirro loo yaqaan ' Jirada invasive group A strep' (iGAS). In kasta oo weli aan caadi ahayn, waxaa kordhay kiisaska iGAS sanadkan, gaar ahaan carruurta ka yar 10 sano. Aad bay dhif u tahay in carruurta qaba xanuunka baarafulka ay qaadaan caabuqa iGAS.

Waalid ahaan, waa inaad ku kalsoonaato xukunkaaga.

Laxariir NHS 111 ama dhaqtarkaaga hadii:

- xanuunka canugaada uu kasiidaraayo
- canugaada oo cunayo ama quudanayo in ka yar inta caadiga
- ilmahaagu wuxuu lahaa xafaayad engegan 12 saacadood ama ka badan ama waxay muujinayaan calaamado kale oo fuuqbax ah
- ilmahaagu waxa uu ka yar yahay 3 bilood waxana uu leeyahay heer kul 38C, ama ka weyn yahay 3 bilood waxana uu leeyahay heerkul ah 39C ama ka sareeya
- ilmahaagu wuxuu dareemaa kulayl ka badan sidii caadiga ahayd markaad taabato dhabarka ama laabta, ama aad dareento dhidid
- ilmahaagu aad buu u daalan yahay ama xanaaqsan yahay

Wac 999 ama aad A&E hadii:

- ilmahaaga waxaa ku dhibban neefsashada – waxaa laga yaabaa inaad aragto sanqadh qaylo ah ama caloosha oo dhuuqeysa feeraha hoostooda.
- waxaa jira hakasho marka ilmahaagu neefsanayo
- maqaarka, carrabka ama dibnaha ilmahaaga waa buluug
- ilmahaagu wuu fidsan yahay mana soo jeedo mana soo jeedo

**Jooji faafitaanka**

Inta lagu jiro xilliyada sare ee xanuunka baarafulka, waxaa sidoo kale laga yaabaa inay korodho kadilaacitaanka xannunkan dugsiyada, xarumaha xanaanada iyo goobaha kale ee xanaanada carruurta. Carruurta iyo dadka waaweyn ee looga shakisan yahay xummad guduudan waa inay ka fogaadaan xannaanada / dugsiga / shaqada ilaa **24 saacadod** ka dib bilowga daaweynta antibiyootigga habboon. Dhaqanka nadaafadda wanaagsan sida gacmo-dhaqashada ayaa ah tallaabada ugu muhiimsan ee ka hortagga iyo xakameynta faafitaanka caabuqa.

Wakumahadsantahy waqtigaaga

**Khayraadka**

NHS- xanuunka baarafulka

Xanuunka baarafulka: calaamadaha, ogaanshaha iyo daaweynta

Ilaalinta caafimaadka carruurta iyo goobaha da'yarta, oo ay ku jirto waxbarashada

Qalabka nadaafadda gacmaha ee dugsiyada